


# SHAQAALEYSIINTA IYO HAYSASHADA

Booqo **MNTransportationCareers.com** si aad u hesho xogo sida muuqaalo, shaqooyin lasoo dhejiyay, tababar hagitaan oo onlayn ah, xogo shaqo, iyo macluumaad badan oo ku saabsan shaqaaleysiinta iyo hayasashada shaqaalaha dayacyirada gaadiidka wakaladdaada.

- Xogaha waxaa loogu talagalay Dadka shaqo raadiska ku jira, Ardayda, iyo Xirfadlayaasha waaxda Shaqaalaha.
- Xogaha iyo muuqaalada waa kuwo si fudud la iskula wadaagi karo
- oo aadna u adeegsan karto dadaaladaada shaqada raadinta.
- Akhri sheekooyinka shaqada ee la xiriiri horumarka lagu guuleystay iyo barnaamijyada shaqada bixiya si aad u hesho fikrado cusub.
- Baaritaan ku samee shaqooyinka hadda lasoo dejiyay iyo/ama soo gudbi shaqooyinkaaga banaan si xayayesiin laguugu sameeyo gudaha barnaamijka MnLTAP.
- Waa xog hagitaan oo si fudud loo adeegsan karo oo bixisa fursado lagu horumarin karo shaqada/xirfada.

## KU XIRNOOW

Mareegta
**mntransportationcareers.com**

Iskaan ku samee si aad u hesho xog dheeraad ah

LRRB LOCAL ROAD RESEARCH BOARD

Minnesota LTAP
University of Minnesota

# SHAQOOYINKA GAADIIDKA DEEGAANKA EE MINNESOTA

Ilo loogu talagalay
Ilaha Xirfadlayaasha Maamulka
Shaqaalaha (Human Resource, HR)

“Waxaan ka shaqeeyay waaxo shaqo oo kalduwan: taraafikada, wadooyinka, baakinada, waxbarashada injineernimada, badelida layrarka... Xog la xariirta xirfada, haddii aad joogteyso indho indheynta aadna awooda saarto waxyaabaha ku xiiso geliya, waxaa kuu furmaaya albaabo.”

Jacob Remmington, Shaqaale Dayactira Wadooyinka, City of Hopkins



“Gaar waxa aad hiigsaneyso. **La jaanqaad** kooxda dayactirka **Agaadiidkeena**.”

## XIDHMO XOG OO DHAMEYSTIRAN

Xirfadlayaasha HR ee ka socda guud ahaan Minnesota waxay sheegaan—inaysan la yaab ahayn—in shaqo doonayaasha ay ugu danayn badan yihiin mushaarka ay helayaan. Waa wax adag in boosaska shaqooyinka shirkadaha gaarka loo leeyahay lagula tartamo mushaarka oo keliya. Hase yeeshee, muujinta guud ahaan xidhmada magdhowga—dheefaha, jadwalada aadka loo qiyaasi karo, iyo dheelitirka shaqada/nolasha ee ay bixiyaan shaqooyinka shirkadaha dadwaynaha—ayaa soo jiita dhammaan dadka qowmiyadaha kaladuwan ee raadinaaya inay ku noolaadaan nolal wanaagsan kuna noolaadaan qoyskooda.

### Dheefaha

Boosaska Shaqooyinka shirkadaha dadwaynaha waxay bixiyaan dheefo badan oo qiimo leh—oo meesha ka saara farqiga mushaarka.

### Jadwalada

Jadwalada shaqada waa kuwo si fiican loo qiyaasi karo oo caadi ah marka lala barbardhigo kuwa boosaska shaqooyinka shirkada gaarka loo leeyahay oo badan.

### Dheelitirka Shaqada/ Nolasha

Shaqooyin badan oo ah kuwa gaadiidka waxay u baahan yihiin in muddo dheeraad ah laga sii shaqeeyo. Boosaska shaqooyinka wakaaladda eegaanka ah waxay u dhaw yihiin guriga waxayna u adeeggaan bulshada.

## U XIRFAD BARASHADA GUUSHAADA

Dad badan oo shaqo raadis ah ayaa qaba aragti qaldan oo ah in boosaska shaqooyinka dayactirka wadooyinka ay u baahan yihiin tababar ka badan inta ay dhab ahaantii u baahan yihiin. Helida tababar gaar ah ama shati (sida kan CDL) oo awood u leh in la shaqeeyo waxaa loo aqoonsan yahay faa’iido rasmi ah. La shaqee kooxdaada gaadiidka si aad u oggaato raadraaca horumarka xirfadaada si aad usoo jiidato ama u haysato hagida tababarka onlaynka ah ee laga helo **MNTransportationCareers.com**.



“Mustaqbalkaagu waa **waa wado furan!**”